



# MAXA KA CUSUB DIB UGU XIRANKA GABLEEDKA SEATTLE

Desember 2020

## Dib-u-furista Buundada Sare ee Galbeedka Seattle 2020

Bishii Maarso 2020, sida danta ugu jirto nabadda dadweynaha, Waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) waxey ka xirtay Buundada Sare ee Galbeedka Seattle dhammaan socodka baabuurta. Bishii Nofember 2020, iyadoo la shaqeyneysa SDOT iyo bulshada, Meeyar Jenny Durkan waxey gaartay go'aan **lagu Dayactirayo** buundada. Buundada waxa la filayaa in **dib loo furo 2022 gudihiisa**.



Waxanu ka shaqeyneynaa inaan dib loogu xirmo Galbeedka Seattle iyo yareynta baabuurta ee xaafadaha ay saameyta ugu weyn ka soo gaartay xiritaanka.

### SAFARKAAGA WUXUU SAAMEYNAYAA QOF KASTA

Iyadoo buundadu ay weli sii xiran tahay, qof kasta wuxuu u baahan yahay iney qeybteeda ka qaadato yareynta saameynta socodkooda ka dhalan karta. Haddii ay suurto gal tahay, fadlan raadi siyaabo kale oo ku tagi karto halka aad aadeyso:

- Socod, wadis, baaskiil, ama mooto
- Raac bas ama qaado taksiga biyaha
- Dad la raac ama la wadaag
- Joog xaafadda kana adeego

Kala doorashooyinkaasi waxey gacan ka geysan karaan yareynta ciriiriga waxeyna difaacayaan caafimaadka dadka ku nool xaafadaha ay saameysay. Haddii aad waddo, nagu caawi in dariskaagu nabad ahaado adigoo raacaya dhaqsiyaha socod ee loogu talo galay meelaha la maro. Talooyinka iyo ilaha ku saabsan marista meelaha xilliga xiritaanka, booqo websaadkeena.



Soco, kaxeyn, baaskiil, ama mooto wad si aad gacan uga geysato yareynta saxmadda.



WARARKA MASHRUUCA IYO LA XIRIIRKA

WestSeattleBridge@seattle.gov | (206) 400-7511  
www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle



Seattle  
Department of  
Transportation

## GANAXA BUUNDADA HOOSE WUU BILAABAYNAYAA 2021

Buundada hoose imika waxey u furan tahay baabuurta gaarka ah oo kaliya habeenkii (9ka fiidnimo ilaa 5ta subaxnimo). Dhammaan waqtiyada kale, waxa kaliya ay u furan tahay baabuurta gurmada deg-degga ah, xamuulka culus, basaska, iyo isticmaalayaasha loo oggol yahay.



**Laga bilaabo Janaayo 2021, baabuurta gaarka ah ee dul maraya buundada inta u dhaxeysa 5ta subax ilaa 9 fiidkii waxa la ganaaxayaa 75 doolar halkii socodba.**

Qorshe ku sii talo gal. Wax badan ka ogow: [www.seattle.gov/transportation/LowBridge](http://www.seattle.gov/transportation/LowBridge)



Buundada hoose ee eegeysa bari.

## 2021 HAGAAJINTA XAAFADAH

### HAGAAJINNADA W MARGINAL WAY SW

Waxanu bishani bilaabeynaa wada hadal iyo xiriiri si waddada W Marginal Way SW u ahaato mid nabad ah una furan qof kasta.

### QORSHEYNTA HOME ZONE

Waxanu la shaqeyneynaa Georgetown, South Park, iyo Highland Park, xaafadaha ay sida aadka ah u saameysay buurta ku leexata, si qorshe loogu abuuro Home Zone oo xaafad kasta ah. Home Zone ku lug lahaada isku keenista dhammaan xaafadaha si ay u wada shaqeeyaan si ay mudnaan u siiyaan hagaajinta lagu yareynayo saxmadda baabuurta iyo hagaajinta socodka iyo dhaq-dhaqaaqa iyo ku noolaanshaha xaafadda.

Si aad wax badan uga ogaato fakarna uga dhiibato booqo websaadkeyna:

[www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle](http://www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle).



Isgoyska SW Spokane St iyo W Marginal Way SW.



Waxa inaga go'an inaan wargelinno xilliga xirnaanshaha Buudada Sare ee Galbeedka Seattle.

### NALA SOO XIRIIR

Waxa inaga go'an inaan kugu wargelinno horumarka iyo guulaha waaweyn inta aannu dhiseyno buundada. Waxanu soo raadsan doonnaa ra'yigaaga joogtada ah ee sida lagu hagaajin karo isu socodka iyo nabadda.

- **Nagu casun inaan si muuqaal ah** ula kulanno kooxdaada ama hey'addaada
- **Usoo iimeel garee ama soo wac** si aad noola wadaagto fakarkaaga: [WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov) or (206) 400-7511
- **Booqo websaadkeena** si aad isugu qorto wargelinta iimeelka toddobaadlaha ah: [www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle](http://www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle)



### WARARKA MASHRUUCA IYO LA XIRIIRKA

[WestSeattleBridge@seattle.gov](mailto:WestSeattleBridge@seattle.gov) | (206) 400-7511  
[www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle](http://www.seattle.gov/ReconnectWestSeattle)



Seattle  
Department of  
Transportation